IIB MA GALO

# FAAFINTA RASMIGA AH

# الجريدة الرسمية

EE JAMHUURIYADDA DIMOQRAADIGA SOOMAALIYA

لجمهورية الصومال الديمقراطية

Sannadka 5aad — Muqdisho, 25 Juunyo 1977 L. 2 R. 6

Laanta Faafin Rasmiga ah ee ka tirsan Madaxtooyada J.D.S.

FAAFIN BIL-SOO BAX — جريدة شهرية

QIIMADU: waa 5 shilin lambar waliba — RUKUNKA: Sanadii waa Sh. 100 Somaliya gudaheeda — dibaddedana waa Shs. 300. Rubunka la weydiisto waqtiga loo gooyey wuxuu ka bilabmaa 1 Janayo. Qiimaha qortitaanku F.R. halkii sadar iyo waxii ka yar waa 2 laba Sh. — Rukunka iyo qoritaanku waxaa la weydiistaa Laanta Maamulka Faafinta Rasmiga ah — Lacagta waxaa lagu bixinayaa Xafiska Canshuraha ee Wasaaradda Lacagta

## KOOBNIIN

### BOGGA KOWAAD

### SHARCI

*SHARCI L. 40 ee 26 Maajo 1977, Nidaaminta, Xilka iyo Awoodda Guddiga Dhexe ee Baarista iyo Nidaamka Xisaabaadka iyo Bakhaaraha X.H.K. Soomaaliyeed.* — *Bogga* 592

### BOGGA LABAAD

### XEER

W. M.

### *BOGGA SADDEXAAD*

*TALOOYIN ISGAARSIIN OGEYSIIS IYO WIXI LA MIM AH*

*W. M*

WAKAALADDA MADBACADDA QARANKA — MUQDISHO

SHARCI L. 40 ee 26 Maajo 77, Nidaaminta, Xilka iyo awoodda Guddiga Dhexe ee Baarista iyo Nidaamka Xisaabaadka iyo Bakhaaraha X.H.K. Soomaaliyeed.

MADAXWEYNAHA
D. D. S.

ISAGOO ARKAY: Xeerka Xisbiga Hantiwadaagga Kacaanka Soomaaliyeed;
ISAGOO ARKAY: Barnaamijka Xisbiga Hantiwadaagga Kacaanka Soomaaliyeed;
ISAGOO ARKAY: Sharciga lamb. 17 ee 1 Luulyo 1976;

ISAGOO AQOONSADAY: inay tahay lagama maarmaan in la soo saaro Xeer Xisbiyeed oo tilmaamaya xilka iyo awoodda Guddiga Dhexe ee baarista X.H.K.S. iyo Nidaamka habka maamulka xisaabaadka iyo Bakhaaraha X.H.K.S.;
ISAGOO ARKAY: Talada uu soo jeediyey Guddiga Dhexe ee Baarista XHKS.
MARKII UU TIXGELIYEY: Go'aanka Guddiga Siyaasiga ee Golaha Dhexe ee X.H.K. Soomaaliyeed.

WUXUU SOO SAARAYAA
XEERKA SOO SOCDA

Qodobka 1aad

Waxaa la oggolaaday Nidaamka xilka, awoodda Guddiga Dhexe ee Baarista iyo Habka Maamulka Xisaabaadka iyo Bakhaaraha ee XHKS. ee Xeerkan ku lifaaqan, waxayna ka mid yihiin Xeerkan, iyagoo leh Sumadda «A» iyo «B».

Qodobka 2aad

Hantida Xisbiga Urur kasta ama Unug kasta ha maamulee waxaa loo ictibaarayaa Hantida Ummadda.

Qodobka 3aad

Ku dhaqan la'aanta ama ka leexadka habka uu faraayo Xeerkan waxaa loo ictibaarayaa fal ka soo horjeeda Dastuurka Xisbiga, Sharciyada ama Xeerka J.D.S. taasoo keenaysa in lagu qaado qof allaale oo aan dhowrin ama ku xadgudba Xeerkan tillaabooyinka Sharciyadu ay farayaan.

Qodobka 4aad

Xeerkan wuxuu dhaqan galayaa marka laga bilaabo 1da Luuliyo 1976

Xeerkan waxaa lagu soo saari doonaa faafinta rasmiga ee Qaranka.

Muqdisho, 26.6.1977

Madaxweynaha Jamhuuriyadda D. Soomaaliya
*Jaaaae S/Gaas Maxamed Siyaad Barre*



«A»

Ujeeddo: NIDAAMINTA XILKA IYO AWOODDA GUDDIGA DHEXE EE BAARISTA.

Qodobka 1aad

(XILKA GUDDIGA DHEXE EE BAARISTA)

1. Guddiga Dhexe ee Baarista X.H.K.S. waa hay'adda ugu sarraysa ee Baarista, wuxuuna xilkiisa yahay inuu eegaa dhaqaalaha, habsamida socodka hawsha Hay'adaha Dhexe iyo Khasnadda Xisbiga.

2. Guddiga Dhexe ee Baarista si xilkiisa u guto wuxuu si toos ah u baari karaa xisaabaha ay maamulaan Urur kasta ee Xisbiga ka mid ah, wuxuuna hubiyaa ilaaliyaana dayactirka iyo hantida Hay'adaha Xisbiga iyo sidii ugu habboonayd oo loo maamulaayo.

Qodobka 2aad

BAARISTA LA XIRIIRA HANTIDA XISBIGA

A) Hawlaha Baarista ee la xiriira hantida Xisbiga waa sida hoos ku Qoran:

1. Kontoroolka ilaha dhaqaalaha Xisbiga iyo hubinta soo hoynta lacagta Xisbiga mutaystay (hubsamada bixinta dhigaalka Xisbiga ee Xubnaha daahid la'aan iyo iibinta qoraallada iyo diiwaangelintooda iwm).

2. Kontroolka iyo Baarista habka isticmaalka maaliyadda Xisbiga iyo hubinta in wax waliba ku baxaan sidii iyo meeshii loogu talo galay.

3. Kontroolka iyo baarista Hantida Xisbiga iyo hubinta in loo maamulo, loo daryeelo, loona isticmaalo si habboon (Gaadiidka, Guryaha, Xafiisyada, Dugsiyada, Qalabka Madbacadaha iwm).

4. Kontroolka iyo Baarista khasnadaha Hay'adaha Dhexe, Hoose ee Xisbiga.

5. Tusaalaynta Hay'adaha Dhexe, Hoose Xagga ilaalinta iyo daryeelka Maaliyadda iyo Hantida Xisbiga.

6. Hubinta inay Urur-Xisbiyeedka Gobollada iyo Degmooyinka si daahid la'aan u soo gudbiyaan Xisaabihii Xarunta Dhexe ku lahayd Dakhligooda.

7. La socodka iyo hubinta dhakhsaha iyo habsamida bixinta Mushaarooyinka iyo Gunnooyinka Hawl-wadeennada Xisbiga.

8. La socodka iyo hubinta buugaagta lacag qabashada ee Xisbigu daabaco.

## Qodobka 3aad

### (HABKA BAARISTA)

A) Habka Baarista iyo awoodda Guddiga Dhexe ee Baarista:

1. Guddiga dhexe ee Baarista, marka ay baarayaan xisaabaadka ay maamulaan Ururrada xisbiga waxay raacayaan habka Baaritaanka xisaabaadka Maamulka Guud ee Dawladda u qoran, waxayna awood u leeyihiin in ay amraan in la joojiyo, la qabto, lana xiro cid allaale ciddii uu galo ama lagu tuhmo raad ah lunsasho, xatooyo, isdhaafin ama dayacid xoolaha Xisbiga.

### (XOGWARRAN FAL CIQAAGEED)

2. Haddii Baarista xisaabaadka la sameeyey ka soo baxaan fal oo noqon kara dembi lid ku ah Hantida Guud ee Xisbiga, Guddoomiyaha Guddiga Dhexe ee Baarista wuxuu si dhaqsi leh xogwarran u gudbiyaa xeer Ilaaliyaha oo ku shaqada leh.

Xeer ilaaliyuhu markii uu helo xogwarranka Guddoomiyaha Guddiga dhexe ee Baarista ama qof ka tirsan Guddiga dhexe ee Baarista wuxuu ku dhaqaaqayaa tallaabooyinka la xiriira dhegeysiga dacwadda ciqaabeedka sida ku qoran qodobbada: 69, 70 iyo 71 ee Xeerka Habka ciqaabta.

### (KA REEBID XIRID DACWO)

3. Iyadoo la gaar qaadayo waxa ku qoran xarafka (b) ee qod. 72 ee X.H.C. falalka ciqaabeedka ee lid ku ah Xoolaha Dawladda ama Hanti kasta ee ay leeyihiin Hay'adaha ku qoran xuxiro Xeer Ilaaliyuhu, wuxuu darsayaa xogwarranka, haddii ay la noqoto in wixii marakac ah ee la hordhigay aanay ahayn kuwo si buuxda u caddayn kara in meeshaas dembi uu jiro iyo in dembigaas oo ku kacay qofka lagu soo eedeeyey, wuxuu amri karaa in baaritaan hor leh uu sameeyo Xafiiska Guddiga Dhexe ee Baarista uu ka helay xogwkarranka fal ciqaabeedka ah, isagoo tilmaamo ka siinaayo wixii marag noqon kara ee meesha ka maqan iyo wixii kaloo xiriir la leh fal ciqaabeedka oo keeni kara in xeer Ilaaliyuhu la'aantood eedeyntaa uu hore u wadi karin.



### (AWOODDA GUDDIGA DHEXE EE BAARISTA)

4. Guddiga Dhexe ee Baarista iyo qof kastoo ka socda Guddiga marka uu hawshiisa baarista ku jiro, wuxuu awood u leeyahay iyagoon waxba lagu xirin:

a) Inuu meel kasta oo caan ah ama gaar ah oo lagu maamulo xoolaha ama hantida Xisbiga galaa, eegaa buugagga xisaabaadka iyo wixii waraaqo, la xiriira, lacagta taalla iyo waraaqaha lacagta ah, ama xoolaha iyo wixii kale uu Xisbigu leeyahay qof kastaba ha sitee;

b) Inuu Xafiiskiisa ugu yeerto qof kasta si uu u weydiiyo kana hubsado arrimaha la xiriira hawlihiisa;

t) Inuu eegaa, ka soo qaataa ama soo qabtaa warqad kastoo ku saabsan xisaabaadka, ama waraaqaha idaariga ah, waraaqaha gaarka ah ama kuwa caamka ah, xoolo kasta oo marakac u noqon kara in ay jiraan fal keeni kara ku xadgudub sharci ama xeer Dawladeedka si loo daryeelo hantida Xisbiga;

j) Qof kasta ee Guddiga Dhexe ee Baarista u baahdo waxaa ku waajib inuu gacan ku siiyaa si ay hawshaa u gutaan;

x) Haddii loo baahdo ama ay la noqoto lagama maarmaan Guddiga Dhexe ee Baarista wuxuu u yeeran karaa Ciidanka NSS, Booliska iyo Guulwadayaasha Ummadda oo ay khasab ku tahay inay gacan ku siiyaan hawsha loogu wacay;

kh) Inuu oggolaadaa, buriyaa ama la wareegaa hawl kasta oo ku shaqo leh Guddiyada Baarista ee Gobollada oo ku saabsan Koontroolka Xisaabaadka Xisbiga iyo wixii kale ee hawl ah oo lagu xil saaray.

## Qodobka 4aad

### *(Hawlaha guud ee Guddiga dhexe ee baarista)*

A) Guud ahaan, hawlaha Guddiga dhexe ee Baarista uu ku lug lahaan karo waa kuwa hoos qoran:

1. Hubinta iyo ka dabatagga sida loo fuliyey Barnaamijka iyo Tastuurka X.H.K.S. iyo go'aannada had waliba ka soo baxa Guddiga Siyaasadda iyo Golaha Dhexe ee X.H.K.S.
2. La socodka iyo hubinta habsamida iyo dhaqsaha socodsiinta hawlaha Xisbiga (kor ilaa hoos).
3. Kormeerka hawlaha Guddiyada Baarista ee Gobollada.

Qodobka 5aad

*Ka qayb galka Shirarka)*

Xubnaha Guddiga Dhexe ee baaristu waxay ka mid yihiin Golaha Dhexe ee Xisbiga, si ay xog-ogaal ugu noqdaan Siyaasadda Xisbiga iyo hawlihiisa, isla markaasna ay ula socodsiiyaan halka ay hadba shaqadoodu marayso.

Qodobka 6aad

*(Guddiyada baarista ee Gobollada)*

1. Laamaha Gobollada ee Xisbiga Hantiwadaagga Kacaanka Soomaaliyeed waxaa laga dhisay Guddi baaris ah oo raacsan Maamul ahaan Guddiga Dhexe ee baarista.
2. Xilka iyo awoodda Guddiyada Baarista ee Gobollada wuxuu la mid yahay kan Guddiga Dhexe ee Baarista in ku-siman Gobolka uu ku shaqada leeyahay.
3. Guddiyada Baarista ee Gobollada had iyo jeer waxa ay u hoggaansami doonaan awaamiirta ka soo baxda Guddiga dhexe ee Baarista iyo kuwa ka soo fula Xafiiska Fulinta ee Gobolka ee tusaaleynaya habka ugu wacan oo xilkooda ku gudanayaan.

Qodobka 7aad

*(Xiriirka Tooska ee guddiga dhexe ee Baarista)*

Guddigu wuxuu toos mas'uul uga yahay Shirweynaha Xisbiga, Muddada u dhexaysa labada shirweyne, wuxuu si toos ah ula shaqaynayaa Xoghayaha Guud ee Xisbiga isaga oo la socodsiinaaya kalana tashanaaya hawlihiisa.

Qodobka 8aad

(Xiriirka Dibedda)

Guddiga Dhexe ee Baarista wuxuu xiriir saaxiibtinnimo, aqoon isweydaarsi, waaya-aragnimo la yeelan karaaa Guddiyada Baarista ee Axsaabta dalalka Hantiwadaagga ah iyo kuwa Horusocodka ah, isaga oo la kaashanaaya Golaha dhexe ee Xisbiga.

Qodobka 9aad

*(Qaabka Guddiga Dhexe ee Baarista)*

1. Guddiga Dhexe ee Baarista, si hawshiisa iyo xilka Dastuurka ka saaran u guto, wuxuu yeelan doonaa Xafiisyo, shaqaale iyo Qaabka dhismaha Guddiga; taasoo lagu soo saari doono Xeer Xoghayaha Guud uu saxiixo isagoo dhegeystay talada Guddoomiyaha Guddiga.
2. Gaar ahaan wuxuu yeelanayaa xubnaha hoos ku tilmaaman:
   a) Xoghayaha Guddiga Dhexe ee Baarista;
   b) Waaxda Baaritaanka Xisaabaha;
   t) Waaxda Kormeerka;
   j) Waaxda Farsamoyaqaannada;



«B»

# XEERKA HABKA XISAABAADKA

Qodobka 1aad

*Buugaagta Xisaabaadka*

Buugaagta hoos ku qoran waa in lagu hayaa Laamaha Xisbiga oo dhan:

1. Buugga Lacagta.
2. Diiwaanno.

Dhammaan Buugaagta xisaabaha waa in kulligood lagu qoraa khad aan tirmayn.

Qodobka 2aad

Tirtiridda

Tirtiridda ama isku kor qoridda tirooyinka buug kastaa oo la xiriiraxisaabaha waa ka reeban tahay. Haddii laga fursan waayo in beddel lagu sameeyo khalad dhacay, waa in xarriijin toosan khad cas lagu mariyaa, lana saxiixaa isla markaana tirada saxa ah waa in lagu qoraa tiihore korkeeda iyana qalin cas.

Buugna tirooyinkiisa lama beddeli karo ama la hagaajin maayo kaddib marka la baaro. haddii aan oggolaansho qoraal ah laga haysan Guddiga Baarista Xisbiga.

Qodobka 3aad

Reebidda isticmaalka Qalinka cagaaran

Qofna looma oggola inuu ku isticmaalo buugaagta Xisaabta qalin cagaaran ama khad cagaaran oo aan ahayn Wakiilada Guddiga Baarista ee Xisbiga.

Qodobka 4aad

Xafidaadda Buugaagta Xisaabta

Marka ay buuxsamaan buugaagta xisaabuhu waa in lagu xafidaa meel adag, lana sii hayaa muddo ku siman labaatan sannadood.

Qodobka 5aad

*Habka laba Gelinta*

Gelin walba oo lagu sameeyo Buugga lacagta, oo aan ahayn kuwa isku gudban ee ka dhexeeya buugga lacagta iyo Bankiga, waa inay gelin waafaqsan ku yeelataa diiwaanka la xiriira, tii ku ahayd qaadasho (Debit) Buugga lacagta waxay ku noqonaysaa dhigasho diiwaanka la xiriira, tii dhigasho (Credit) ku ahayd buugga lacagta waxay dhabii ku noqonaysaa diiwaanka la xiriira.

## Qodobka 6aad

### Buugga lacagta

Baal walba oo ka mid ah buugga lacagta, waa inuu u qaybsamaa la ba dhinac dhanka qaadashada (left-hand) iyo dhanka dhigashada (Right hand) Dhanka qaadashada wuxuu u qaybsamaa toddoba khaanadood ee soo socda:

1. Taariikh. 2. magaca dhiibaha. 3. Madax iyo Madax Xigeen 4. Faahfaahinta dakhliga. 5. Lambar. xaashida lacag-bixinta. 6 Jeeg lambarka. 7. Naqdiga. 8. Bankiga.

## Qodobka 7aad

### *(Maamulka Buugga lacagta)*

Lacagaha la qabtay oo dhan waa in gooni gooni u u geliyaa khasanajiga ama lacag hayuhu buugga lacagta Marka lacag toos loogu shubo xisaabta socota ee Xisbiga Bankiga uga furan, waa in loo jaraa xaashida lacag qabashada kaddib marka la helo xaashida dhigniinka lacagta oo Bankigu uu soo shaabadeeyay, dabadeedna waa in lacagtaa la geliyaa dhinaca qaadashada (dakhliga) khaanadda Bankiga ee buugga lacagta.

Dhammaan kharashyada uu Bixiyo khasnajigu ama lacaghayuhu waa inuu gooni gooni u geliyaa dhinaca kharashka ee Buugga Lacagta. Lacagaha naqdiga loo bixiyey waxaa la gelinayaa khaanadda naqdiga ee Buugga Lacagta. Lacagaha jeegga lagu bixiyeyna waxay galayaan khaanadda Bankiga ee Buugga Lacagta.

Lacagaha la qabto ama la Bixiyo waa in buugaagta xisaabaha la geliyaa isla taariikhda la qabtay ama la bixiyey.
Kharashyada waa inaan la bixin ka hor inta aanay Bislaanin

## Qodobka 8aad

### *Kharashka dib loogu riixay sannad-guurada dambe ee Miisaaniyadda*

Kharashka ku habboon in laga bixiyo Miisaaniyadda sannad-guurada waa in isla Sannadkaa la bixiyaa. Kharashka ay ahayd in la bixiyo Sannad-guuradii hore ee Miisaaniyadda, waa in aan la bixin, ilaa oggolaansho laga helo xoghayaha Guud ee Xisbiga, xaashiyaha lacag-bixinta ee la xiriira kharashkaa dib u dhacay waa in la soo raaciyaa faahfaahin ku saabsan sababta dibudhaca kharashkaas keentay oo uu saxiixay Guddoomiyaha Haggaanka Maaliyadda ee Xisbiga.



## Qodobka 9aad

### *Taageeridda xaashiyaha Lacag-qabashada*

Dakhli kasta oo la qabto waa in lagu kabaa ama lagu taageeraa koobiga labaad ama buugga lacag-qabashada oo si taxan u lambarsan ama buugga lacag-qabashada guud, haddii aanay ahayn dakhliga xaashiyaha lacag-bixinta (Vouchers) lagu reebay.

## Qodobka 10aad

### Maamullka Dhakhliga iyo kharashka

Lacagta la qabtay waa in gooni gooni loo geliyaa buugga lacagta. Hase yeeshee lacagihii isku xiriirsan ee gooni gooni loogu qabtay buugga lacag-qabashada guud waa la isku wada geyn karaa si mar qura loo geliyo buugga lacagta, laakiinse waa in lambarradoodu isku wada xigaa.

Xaashiyaha lagac-bixinta waa in si xiriirsan loo lambariyaa billowba billowgeeda ilaa dhammaadkeeda tii oo laga bilaabayo 1 (kow) ilaa inta bisha ay gaaraan, iyagoo buugga lacagta loo gelinaayo gooni gooni, haddii aanay lahayn F. 12

Lambarka xiriirsan ee jeegga waa in lagu muujiyaa buugga lacagta halka ku beegan kharashyada jeegga lagu bixiyey.

## Qodobka 11aad

### *(Dheellitirka haraaga naqdiga)*

Maalin walba waa in la isku dheelli tiraa lacagta naqdiga ah ee gacanta ku jirta iyo haraaga uu muujinaayo Buugga lacagtu. Waxaa loo baahan yahay in xarriijin toosan la mariyo buugga lacagta marka la soo saarayo haraagiisa si loo helo dheellitir maalmeed.

## Qodobka 12aad

### *Dheellitirka Bankiga*

Bil kasta dhammaadkeeda waa in la helaa warbixinta Bangiga. Dakhliga iyo kharashka ku qoran warbixinta Bankiga waa in lagu hubiyaa khaanadda Bankiga ee Buugga lacagta. Xisaabtii midkood laga waayo ee ka kale ku muujisan waa in lagu caddeeyaa xaashida dheellitirka Bankiga. Xaashidani waa inay isu dheellitirtaa haraaga Buugga Lacagta, Khaanadda Bankiga iyo haraaga ku muujisan warbixintii Bankiga. Xaashida dheellitirka Bankiga waa in la sameeyaa Bil walba ama toddobaadkiiba, haddii Guddiga baaristu sidaa doonaan, amaba markii loo baahdo: Tusaale (Marka khasnaji ama Lacag haye uu mid kale xil ku wareejinaayo) waana in la geliyaa Buugga Lacagta.

Xaashida lacag-qaadashada ama xaashida lacag-bixinta waa in si degdeg ah loogu sameeyaa si ay u kabto dakhligii ama kharashkii ka soo baxay warbixintta Bankiga ee aan horey gelin buugga lacag-ta.

Khasnajigu waa inuu hubiyaa jeegagga ka baxay Hoggaanka Maaliyadda Xisbiga in lagu qaatay waqti habboon. Waana inuu khasnajigu weydiiyaa hadday jiraan jeegag aanu weli bixin.

Qodobka 13aad

(Xisaabta dahsoon ee maalmeed)

Xisaabta bileed ee dahsoon waa in la sameeyaa Bilwalba si loo dakhliyada iyo kharashyada Madaxyaasha iyo madax-xigayaasha Misaaniyadda. Dhammaan xaashiyaha lacag-qabashada iyo kuwa lacag-bixinta ee aan ahayn kuwa la xiriira xisaabaha amaahda iyo curaarka waa in lagu guuriyaa maalin walba madax-xigayaasha kala geddisan Xisaabta daahsoon ee maalmeed.

Bil walba dhammaadkeeda waa in la ogaadaa wixii madax-xige kasta soo galay ama ka baxay.

Biirada madax-xigayaasha ee ku muujisan warqadda soo koobid-da waa in la isku geeyaa. Biirada Guud ee dabayaaqada kuu soo baxda ayaa waxa lagu guurinayaa xisaabta bileed ee daahsoon.

Qodobka 14aad

*(Xisaabta Bileed ee Daahsoon)*

Xisaabta bileed ee dahsoon waa in la sameeyaa bil walba si loo helo biirooyinka madaxyaalka iyo madax-xigeyaalka dakhliga iyo kharashkaba ee dhammaadka bil walba ilaa dhammaadka xisaabta Sannad-guurada.

Sannadka Billowgiisa tafaasiisha madaxa iyo madax-xigaha u gaarka ah waa in lagu muujiyaa dusha khaanadda ay kaga qorma-yaan xisaabta bileed ee daahsoon tii oo la waafajinayo faahfaahintii qiyaasta la oggolaaday. Wixii kayd ahaan loogu tala galayna waa in khad cas iyana lagu muujiyaa. raadraac awoodihii kororsiimada ama dhimista iyagana waa in la muujiyaa. Tafaasiisha awoodahaa-si waa in la geliyaa isla markii la helo. waa in khaanad loogu tala galaa Madax-xige kasta oo lagu muujiyo haraaga aan la isticmaalin, si ay u fududaato muujinta biirada madaxu.

Xisaabta daahsoon ee bileed waxa laga guurayaa bil waliba dham-maadkeeda biirooyinka ay muujinayaan Madax-xigayaasha ee xisaabta daahsoon ee maalmeed. Harayada aan la isticmaalin waa in la geli-yaa khaanadaha ku habboon.



Biirada Madax kasta waxa lagu helaa isugeynta tirooyinka Mada-xigayaashiisa ee galay khaanadihii. ku habboonaa.

Biirada Madax kasta waxa dabadeed lagu guuriyaa xaashida soo koobidda dakhliga iyo kharashka.

Koobiyada ayaa la isku daraa si loo helo biirada dakhliga iyo kharashka ee ilaa dhammaadka bishaas.

Qodobka 15aad

Xadka haraaga naqdiga

Meeshii aan Banki ka furnayn lacagta naqdiga ah ee ka badata inta loo baahan yahay waa in si aan dibu dhac lahayn loo geeyaa Bankiga. Xadka naqdiga loo oggolyahay Xafiisyada khasnadda Xisbi-ga waa inaysan ka badan kan uu u qarriray Guddoomiyaha Hoggaan-ka Maaliyadda Xisbiga.

Qodobka 16aad

Guddoomiyaha Hoggaanka Maaliyadda Xisbigu waa inuu soo diyaariyaa Sannadguura walba dhammaadkeeda xaashida muujinaysa hantida Xisbiga iyo qaantiisa. dhammaan haraayada ay tusinayso xaashida hantida iyo qaanta waa in la raraa si ay u billowdo shaqada sannadka soo soceda.

Qodobka 17aad

*xisaabta sannad-guurada*

Xisaabta sannad-guurada ee la diyaariyey waa in loo gudbiyaa Guddiga dhexe ee Xisbiga kama dambays 30ka Abriil ee Sanadka Xiga Sannadka ay ku lug leedahay xisaabta Sannad-guuradu. waxay-na ka koobnaanaysaa warbixinnada soo soceda:

1. Dakhliga iyo kharashka Sannadguurada:
2. Xaashida Hantida iyo qaanta ee 31ka Disember;
3. Warbixinta muujinaysa isbarbardhigga tirooyinka Madax-xigayaalka ee dakhliga iyo kharashka dhabta ah iyo qiyaasi-hii isla Sannad-guuradaas iyo tirooyinka dhabta ah ee Sannad-guuradii hore;
4. Warbixinta muujinaysa soo koobidda curaaraha weli taagan 31 ka Diseembar;
5. Warbixinta muujinaysa soo koobidda amaahaha weli taagan 31 ka Diseembar;
6. Koobiyada hore ee warbixinnada oo dhan waa in loo gudbiyaa Guddiga Baarista Xisbiga kama dambays 30ka Apriile ee Sannadka xiga Sannadka ay la xiriiro xisaabta sannad-guuradu.

Qodobka 18aad

*Xisaab Gelinta Lacag Hayaha*

Lacag-hayaha Xisbiga ee dibaddu waa inuu xisaab celin u soo diraa Khasnajiga Xisbiga kama dambays 15ka Bisha xigta, dhammaadka bisha xisaabta ku lug leedahay. Warbixinnada iyo xisaab-celintu waxay ka koobmayaan waxyaalaha soo socda :

1. Koobiyada hore ee Buugga lacagta;
2. Koobiyada labaad ee xaashiyaha lacag-qabashada;
3. Koobiyada kore ee xaashiyaha lacag-bixinta;
4. Koobiyada dakhliga iyo kharashka;
5. Fanidaada dakhliyada iyo Kharashyada;
6. Caddaynta haraaga naqdiga ama war-bixinta dheellitirka Bangiga;
7. Xisaab celinta buugaagta lacag qabashada ee aan weli la isticmaalin;
8. Xisaab celinta dakhliga dawladda dhexe loo uruuriyey;
9. Xisaab celinta xaashiyaha lacag-bixinta ee weli maqan;
10. Liistada qaaraan dhiibayaalka.

Qodobka 19aad

D A Y M A N K A

Guddoohiyaha Hoggaanka Maaliyadda Xisbigu waa siin karaa amaah shaqaalaha xubnaha Xisbiga.

Kharashka ku habboon in laga bixiyo Madax-xige Miisaaniyadeed lagama bixin karo xisaabta amaahda.

Deynta Shaqaalaha la siiyo waxay ku bixinayaan saddex hormo bileed oo is le'eg.

Qodobka 20aad

*Bixinta deymanka*

Deymanka loo raaco qofkii ay ku luntay hanti dawladeed (lacag ama alaab) wuxuu iskaga gudayaa hormooyin bileed oo ku siman muddo aan ka badnayn 2 Sannadood.

Qodobka 21aad

*Diiwaan gelinta Deymanka*

Xisaab amaaheed oo walba waa in laga geliyaa diiwaanka amaahda baal u gaar ah. Tafaasiisha soo socotana waa in baal kasta korkiisa lagu qoraa:



1. Magaca qofka ama hay'adda amaahda qabto;
2. Awooddii amaahdaas lagu oggolaaday;
3. Tirada amaahda;
4. Shuruudaha la iskaga gudaayo amaahda.

Xisaabta amaahda ee lagu Minguuriyey diiwaanka amaahda waa in bil walba la isku geeyaa lana dheellitiraa. Dabadeedna haraaga loo qaadaa bisha xigta.

Qodobka 22aad

*Curaarrada la sheegan waayo*

Dhammaan curaarrada lagu soo doonan waayo saddex sannadood oo ah Sannad-guurada Miisaaniyadda oo ka danbeysa Sannadkii la qabtay, curuurrada waxa lagaga saarayaa curaarka, xisaab toosan waxaana lagu shubayaa cashuurta dadban. Haddii gadaal laga soo sheegto lacagta la xareeyey isla sannadkaa lagu shubay canshuurta dadban, waxaa laga celinayaa isla halkii lagu shubay, haddii kale waxa laga celinayaa madaxxigaha loogu tala galay kharashyada lacag-celisyada sannadihii hore.

Haraaga aan la bixin ee ku hara buugga kharashka lagu ilaaliyo laguma wareejin karo Curaar.

Qodobka 23aad

Sharaxa Hormariska

Horumarisku waa deyn loo dhiibay qof ka shaqeeye ama xubin ka ah Xisbiga si uu ugu maamulo kharashyada yahyar ee shaqada Xisbiga ee aan suurtagal u ahayn khasnajiga Xisbiga inuu markiiba bixiyo.

Qodobka 24aad

Noocyada Hormariska

Hormarisyada waa in lagu dhiibaa amarka Guddoomiyaha hoggaanka Maaliyadda Xisbiga, waxayna u kala baxaan laba nooc:

1. Hormaris gaar ah oo loogu talagalay ujeeddo gaar ah iyo waqti gaar ah.

2. Hormaris joogto ah, oo kolba la cosboonaysiisan karo inta lagu jiro Sannad-guurada Miisaaniyadda iyada oo loo gudbinaayo khasnajiga ama Lacag-hayaha lacagta uu hayo iyo XLB ee uu bixiyey si loogu cusboonaysiiyo.

Qodobka 25aad

*Xereynta Hormarisyada*

Hormarisyada joogtada ah waxa la soo xereynayaa dhammaadka Sannad-guurada Miisaaniyadda. Hormariska gaarka ah waxa la soo xereynayaa isla waqtigii loogu talagalay gudihiisa.

Lacagta hormarisyada gaarka ah waxa lagu xisaabtamayaa in lagu dhammeeyo ujeeddadii gaarka ahayd ee laga lahaa.

Hormarisyada waxaa la isku siin karaa oo qura ujeeddooyinka iyo awooddii hormariska lagu oggolaaday waa in lagu qoraa xaashida lacag-bixinta korkeeda ee lagu dhiibaayo hormariska.

Qodobka 26aad

Diiwaan gelinta hormariska

xisaabaha hormariska joogtada ah waa in la diiwaan geliyaa mid walbana waxa laga gelinayaa diiwaanka baal u gaar ah. Tafaasiisha soo socda ayaa baal walba korkiisa lagu qorayaa:

1. Jagada sargaalka hormariska loo dhiibay;

2. Dhinaca hormarisyada gaarka ah magaca iyo jagada sargaalka loo dhiibay hormariska;

3. Lacagta hormariska;

4. taariikhda hormarisyada gaarka ah la soo xereynaayo.

Qodobka 27aad

Dhiibidda hormariska

Khasnajigu wuxuu ku dhiibayaa lacagta hormariska xaashida lacag-bixinta isagoo dhigasho (Credit) garaynaayana xisaabta hormariska.

Qodobka 28aad

*Buugga lacagta ee maamulaha hormariska*

Maamule hormaris oo walba waxa laga doonayaa inuu haysto Buugga lacagta, lacagta hormariska waa in la geliyaa dhinaca qaadashada ee buugga lacagta, kharashyada oo dhan, waxaa la gelinayaa dhinaca dhigashada ee buugga lacagta.



Qodobka 29aad

Cusboonaysiinta hormariska

Hormariska waxaa la cusboonaysiin karaa bishiiba mar ama had iyo jeer sidii loogu baahdo. Maamulaha hormarisku marka uu cusboonaysiisanaayo hormariska waa inuu u gudbiyaa buuggiisa lacagta. xaashiyaha lacag bixinta iyo naqdiga harsan khasnajiga oo isna hubinaaya buugga lacagta iyo xaashiyaha lacagbixinta iyo hagaaga hormariska. khasanajigu wuxuu saxiixayaa buugga lacagta hormariska, wuxuuna u samaynayaa xaashiyo lacagbixineed oo kala gooni ah kharashkii madax-xige walba ka baxay.

Cusboonaysiinta hormarisku ma beddeleyso xisaabta hormariska ee diiwaanka ku jirta.

Maamulaha hormarisku wuxuu ku muujinayaa dhinaca qaadashada ee buuggiisa lacagta hormariska uu ka soo cusboonaysiistay khasnajiga. Haraaga hormariska ee buugga lacagta waa inuu dabadeed la mid naqdaa lacagtii hore ee hormariska.

Marka hormaris la soo xereynaayo waa in Maamuluhu marka hore u cusboonaysiistaa hormariska sida nidaamka ku tifaftiran qodobka 52aad. Dabadeedna wuxuu lacagta hormariska oo dhan u celinayaa khasnajiga oo isna goyn doona xaashida lacag qabashada ee shareiga ah isagoo dhigashada garaynaya xisaabta hormariska ee diiwaanka ku jirta.

Qodobka 30aad

DAKHLI

Dhammaan lacagaha soo gala Xisbiga waxa lagu qabanayaa xaashiyaha lacag qabashada guud ee rasmiga ah.

Qodobka 31aad

Reebidda xaashiyaha lacag qabashada ku meel gaarka ah

Xaashiyaha lacag qabashada iyo foomamka kale ee si meel ku gaarnima ah loo isticmaalaa waa ay reebban yihiin.

Buugaagta lacag qabashada guud waa in loo daabacaa qaab buug oo xaashi walba saddexan tahay, loona lambariyaa si taxan, lagana soo daabacdaa Madbacadda Dawladda oo kaliya.

*Qodobka 32aad*

*Tirtiridda xaashiyaha lacag qabashada*

Haddii warqadaha madow (kaarboonka) ahi si fiican u wada gaarin koobiyada xaashida lacag qabashada waxa xuruuf waaweyn lagu qorayaa waa la «tirtiray». dhammaan koobiyaduna waxay ku harayaan buugga si loo arko marka la hubinaayo.

## Qodobka 33aad

*Beddelaaddu waa reebban tahay*

In beddelaad lagu sameeyo xaashida lacag qabashada waa ay reebban tahay. Haddii khalad dhaco, dhammaan koobiyada xaashida lacag qabashada waa la tirtirayaa, waxaana la dhiibiyaa mid cusub, dhammaan koobiyadu waxay ku harayaan buugga si loo arko marka la hubinaayo.

Xaashi walba oo lacag qabasho oo uu ka siiyo khasnajigu ama lacag-hayihiisu canshuur ururiyaha lacagtii uu ku soo shubay khasnadda waxaa lagu muujinayaa lambarkii ugu horreeyey iyo kii ugu danbeeyay ee buugaagtii uu lacagta ku soo ururiyay canshuur ururiyuhu.

Xafiis kasta oo Xisbigu leeyahay lacagna loogu uruursho waa in ogeysiis loogu dhajiyaa dadweynaha faraya inay qaataan xaashida lacag qabashada oo si rasmi ah u lambarsan lacag kasta oo Xisbiga u soo xereeyaan.

## Qodobka 34aad

*Hubinta buugaagta qiimaha leh helitaankooda*

Dhammaan Buugaagta lacag qabashada guud waa inuu khasnajigu ama Sargaalka kale ee ka tirsan Xisbigu ee loo xilsaaray si degganiskaga hubiyaa marka ay soo gaaraan. Sargaalka ka mas'uulka ah buugaagta waa inuu degdeg ula socodsiiyaa Madbacadda Dawladda wixii isdhaaf ah ee uu arko, isla markiibana ugu celiyaa Xafiiskii uu ka helay baqshad ballaansan buugaagta laga helay gafafka. Haddii la raaci waayo nidaamkaasi wixii khasaare soo gaara Xisbiga waxaa loo raacayaa Sargaalkii ka mas'uulka ahaa buugaagta.

## Qodobka 35aad

*Diiwaanka buugaagta*

Buugaagta qiimaha leh ee aan la isticmaalin waa in lagu ilaaliyaa meel adag oo quful iyo fure leh. Dhammaan buugaagta qiimaha leh waa in gooni gooni loo geliyaa diiwaanka buugaagta iyaga oo isku lambar xiga Diiwaannada buugaagta waa in loo sameeyaa fure buug. Lana siiyaa buug walba oo nooc gooni ah xirmo baalal ah oo si taxan u lambarsan. Balaalkaana waxaa loo samaynayaa khaanadaha soo socda.

1. Taariikhdii la helay;
2. Lambarkii xaashida alaab dhiibidda ee Madbacadda Qaranka;
3. Lambarradii ay ka billaabmayaan;
4. Lambarka ay ku dhammaanayaan;
5. Taariikhdii la dhiibay;
6. Xafiiska iyo magaca Sargaalkii qabtay (Xuruuf waaweyn);
7. Saxiixa sargaalka qabtay
8. Taariikhdii ay dhammaadeen.

Khasnajiga ayaa ka mas'uul ah hubinta tafaasiisha helidda iyo dhiibidda in si habsami ah loo diiwaan geliyey

*Qodobka 36aad*

*Buugaagta qiimaha leh waa in qof qof loo qaadaa*

Buugaagta lacag qabashada ee ay u baahan yihiin canshuur uruuriyayaashu waa inay qofqof uga qaataan khasnajiga una saxiixaan. Waa in foojignaan loo yeeshaa in loo dhiibay si isku lambar xigta.

Qodobka 37aad

Dheeraadka Bugaagta Qiimaha leh

dhammaan Buugaagta qiimaha leh ee buuxsantay. kuwa bar lagu isticmaalay iyo kuwa aan weli la isticmaalin waa in si dibudhac lahayn loogu celiyaa khasnajiga intii dheeraadka ka noqota wixii loo baahnaa. Khasnajigu isaga ayaa ka mas'uuu ah buuxinta khaanadaha la xiriira eediiwaanka buugaagta dheeraadka ah iyo kuwii bar lagu isticmaalayba.

Bugaagta qiimaha leh ee dhammaatay, iyo kuwa bar la isticmaalay waa in lagu ilaaliyaa meel adag oo quful iyo fure leh inta Kormeer ay ugu imaanayaan Guddiga Baarista ee Xisbiga. Dabadeed ayaa laga yaabaa in lagu gubo Guddiga Baarista horteeda.

Qodobka 38aad

Buugaagta qiimaha leh ee aan weli la dhiibin waa inuu khasnajigu ku hubiyaan had iyo jeer haraaga diiwaanka Buugaagta.

Khasnajiga ayaa ka mas'uul ah inuu hubiyo had iyo jeer buugaagta qiimaha leh inay yaalliin in ku filan socodsiinta hawlaha.

Saraakiisha loo dhiibo buugaagta qiimaha leh ayaa ka mas'uul ah xafidaadooda.

Qodobka 39aad

*Buugga lacagta ee Canshuur-uruuriyaha*

Canshuur uruuriye kastaa waa inuu leeyahay buugga lacagta ee canshuur ururuuriyaha.

Buuggani waa inuu noqdaa nooca caadiga oo uu baal waliba u qaybsamaa laba dhinac. Dhanka qabashada waa inuu u qaybsamaa saddexdan khaanadood:

1. Taariikh;
2. Lambarka xaashida lacag-qabashada;
3. Lacagta;

Dhanka dhigashada isna waa inuu u qaybsamaa saddexdan khaanadood:

1. Taariikh 2 lambarka xaashida lacag-qabashada. 3 Lacagta Canshuur ururiyaaayaashu waa inay maalin walba geliyaan buugaagtooda lacagaha ay qabtaan iyo lambarrada xaashiyaha lacag-qabashada ee ay dhiibaan si ay u fududeeyaan hawlaha kormeerka.

Qodobka 40aad

*ku hooynta khasnadda dakhliga cashuur ururiyayaasha*

Lacag ururiye kastaa waa inuu dhammaan lacaguhuu uruuriyay ku hooyaa khasnadda ama Lacag-hayaha Marka ay hooynayaan lacag uruuriyayaashu waa inay dhiibaan buugaagta lacagta iyo dhammaan buugaagta lacag qabashada ee ay isticmaalaan. Khasnajigu waa inuu hubiyaa buugaagta lacagta ee canshuur ururuuriyayaashu, haraaga naqdiga iyo lacagta gacanta ay ku hayaan.

Khasnajigu waa inuu saxiixaa buugaagta lacagta canshuur ururiyaasha una jaraa xaashiyaha lacag qabashada lacagaha ay soo xereeyaan.

Xaashiyaha lacag qabashada guud ee uu khasnajigu siiyo canshuur uruuriyayaasha waa inay haystaan tusaanna Guddiga Baarista Xisbiga marka ay uga baahdaan.

Dammaan buugaagta lacagta ee canshuur uruuriyayaasha ee buuxsama waa in la xafidaa ugu yaraan 20 Sano.

Dhammaan canshuur uruuriyayaashu waa inay samaystaan bugag yaryar oo taageereysa khasnajiga haddii uu u baahdo hagaagsanaanta ajuurada iyo canshuuraha, dhammaan canshuuraha la uruuriyo waa in lagu hooyaa khasnadda iyaga oo dhan.

Qodobka 41aad

Foomamka Xisaabaha

Foomam xisaabeed ama buugaag lama keensan karo laamaha Xisbiga haddii aan oggolaansho laga haysan Guddoomiyaha Hoggaanka Maaliyadda ee Xisbiga.

Qodobka 42aad

Dheeraadka Naqdiga

Haddii mar uun la helo dheeraad naqdi oo lana garan waayo sida uu ku yimid waa in degdeg loo xereeyaa loona jaraa xaashida lacag qabashada laguna shubaa canshuurta dadban, dabadeedna lala socodsiiyaa Guddoomiyaha Haggaanka Maaliyadda Xisbiga iyo Guddiga Baarista.

Dhammaan Saraakiisha xisaabaadka waainay ku shaqeeyaan amarrada khasnajiga oo ah sargaalka sare ee xisaabaha Xisbiga.

### Qodobka 43aad

### Awoodda Kharashka

Awoodda qura ee kharashku waa oggolaashaha qiyaasihii Miisaaniyadda.

### Qodobka 44aad

### Shaqooyinka Sargaalka Idman

Waa Shaqada Sargaalka idman inuu:

1. Hubiyo kharashku inuu sax yahay Madax-Madax-xigayaasha Miisaaniyadda laga bixinayo;

2. Hubiyo inuu kharashku ku keeneyn xad dhaaf qiyaasaha Miisaaniyadda;

3. Hubiyo xaashida lacag bixintu inay xisaabteeda iyo tafaasiisheedu sax yihiin;

4. hubiyo inuu magac qaatuhu sax ugu qoran yahay xaashida lacag bixinta korkeeda.

### Qodobka 45aad

### *xaashiyadaha lacag bixinta*

Kharash walba waa inuu bixiyaa khasnajigu ama lacag-hayuhu, laguna bixiyaa xaashida lacag bixinta ee asalka ah ee habboon.

### Qodobka 46aad

### *noocyada xaashiyaha lacag bixinta*

xaashiyada lacag bixintu waa inay noqdaan noocyadan:
1. Musaarooyinka iyo mushqaayadaha;
2. Kharashyada kale;

2. xaashiyadaha lacag bixinta waa in lagu qoraa khad ama qalin aan tirmin ama makiinadda qoraalka.

Lacagta xaashiyaha lacag bixinta waa in la siiyaa qofkii ama dadkii dhabta u lahaa.

Kharash walba waxaa lagu sameeyaa xaashi lacag bixineed oo u gooni ah, kuwa mushaarooyinka iyo mushqaayadaha mooyaane.

Xaashi lacag bixineed oo gooni ah waa in loo sameeyaa kharashkii ka baxaaya Madax-xige walba oo Miisaaniyadda ah.

Haddii qof shaqaale ah u suurtoobi weydo inuu isagu mushaharkiisii qaato, wuxuu siinayaa qof kale wakiilasho qoran oo ku socota khasnajiga si uu ugu soo qaato mushaarkiisa.

Qofka la wakiishay ayaa saxiixaaya xaashida lacag bixinta waxaana lagu lifaaqayaa wakiilashadii qornayd.

Qodobka 47aad

*Warqadaha waqtiga*

Xaashiyaha lacag bixinta mushqaayadaha ee shaqaalaha ee ku qaata maalintii waa in lagu taageeraa waraaqaha waqtiga oo uu sameeyay, saxiixayna Sarkaalka Kormeeraha u ah Shaqaalaha. Tusaale: Kormeere Shaqo.

Dhammaan xaashiyaha lacag bixintu waa inay muujiyaan faahfaahintii Shaqada ama hawsha kharashka lagu bixinaayo.

Qodobka 48aad

*Reebidda beddelaadda xaashiyaha lacag bixinta*

Xaashida lacag bixinta lama oggola in la beddelo kaddib marka la bixiyo.

Haddii isdhaaf lagu sameeyo xaashida lacag bixinta, khaladkaa waxaa lagu saxi karaa xaashida xisaab toosinta, xaashidii lacag bixinta sideeda ayaa lagu dhaafayaa.

Qodobka 49aad

*Dalabka Iibsashada Gudaha*

*Xaashiyaha lacag bixinta ee ku saabsan bakhaarrada iyo alaabooyinka waa in lagu taageeraa qaansageegta laga soo gataha iyo dalabkii iibsashada gudaha. Caddaynta muujinaysa alaabta la soo iibsaday waa in la diiwaan geliyaa haddii aanay ahayn alaabtu mid* tiro yar oo markiiba la isticmaalayo, kuwaasna waa in caddaynta lagu muujiyaa inay yihiin kuwa markiiba la isticmaalayo.

Qodobka 50aad

*lacag celisyada*

Mar allaale markii la celinaayo canshuur ama curraar, raadraac taxan waa in lagu sameeyaa xaashida lagac bixinta korkeeda, sida taariikhdii la qabtay canshuurta ama curaarta markii hore ama xaashidii xisaab toosinta ee curaarka loogu soo wareejiyey dakhliga

Qodobka 51aad

*Qabashada xaashiyaha lacag bixinta*

Dhammaan xaashiyadaha lacag bixinta waa in lagu qaabtaa mid ka mid ah dariiqooyinka soo socda:

1. Qiraal khad ku qoran oo uu la siiyuhu ku sameeyo xaashida lacag bixinta korkeeda haddii uusan keenin xaashida lacag qabashada, ama

2. Xagga kharashka mushqaayadahana qiraal khad qoran oo qaatayaashu ku sameeyaan waraaqaha waqti ee ku lifaaqan xaashida lacag bixinta korkeeda, hase ahaatee dadka waxba qorin waxna akhriyin waxa lagu dhaqmayaa qodobka 99aad ee hoos ku qoran, ama;

3. Xaashida lacag qabashada ee rasmiga ah ee la siiyaha oo lagu soo lifaaqo xaashida lacag bixinta.

### Qodobka 52aad

*Kharash siinta aqoonlaawayaasha*

Kharashka la siinaayo aqoonlaawayaasha waa in lagu taageeraa caddayn xaashida lacag bixinta korkeeda ah ama warqadda waqtiga oo uu soo sameeyey qof aqoon lihi oo aan ahayn Sarkaalka bixinaaya kharashka oo muujinaysa in isaga oo jooga lacagtaa la bixiyey. Markhaatiyaashu waa inay saxiixaan khaanadda qiraalka oo ku beegan lacag walba oo la siiyey aqoonlaawe.

### Qodobka 53aad

*Shaabadaynta xaashiyaha lacag bixinta*

Xaashiyaha lacag bixinta iyo dhammaan xaashiyadaha ku lifaaqan waa in lagu shaabadeeyaa taariikhda iyo shaabadda xafiiska marka la bixinaayo.

### Qodobka 54aad

*Mushqaayadaha la soo sheegan waayo*

Dhammaan Mushqaayadaha la soo doonan waayo waa in lagu celiyaa khasnadda iyadoo lagu shubaayo xisaabta curaarta, laguna magacaabayo «Mushqaayadaha la soo sheegan waayey» diiwaan gelintooda. Kaaliye diiwaan waa in loo sameeyaa Mushqaayadaha la soo doonan waayey oo lagu muujinayo faahfaahin buuxda sida lambarka xaashida lacagqabashada ee Mushqaayadaha lagu soo celiyey. Haddii lacagtaa gadaal laga soo sheegto waxa loo samaynayaa xaashi lacag bixineed oo cusub. Haddii la soo sheegan waayo kaddib marka ay ka soo wareegto 2 Sannad-guuro Miisaaniyadeed marka lacagta curaar lagu shubay,
lacagtaa waxa lagu wareejinayaa dakhliga (Revenue).

### Qodobka 55aad

*Sannad-guurada Miisaaniyadda*

Sannad-guurada Miisaaniyaddu waxay ka billaabanaysaa maalinta ugu horreysa bisha Jannaayo waxayna ku dhammaanaysaa maalinta 31kaee bisha Disember.

## Qodobka 56aad

*Diyaarinta Miisaaniyadda*

Guddoomiyaha Hoggaanka Maaliyadda Xisbigu wuxuu diyaarinayaa kama dambeys 31ka bisha Agoosto Sannad walba ku talagalka qiyaastii Miisaaniyadda ee Sannadka soo socda:

## Qodobka 57aad

*oggolaansho*

Guddoomiyaha Hoggaanka Maaliyadda Xisbigu wuxuu hordhigayaa ku talagalka qiyaastii Miisaaniyadda Guddiga Dhexe ee Xisbiga ugu yaraan saddex bilood ka hor dhammaadka sannadguurada ka horreeysa tan leh ku talagalkaa qiyaasta Miisaaniyadda.

Guddiga Dhexe ee Xisbigu waxay oggolaanayaan qiyaastii Miisaaniyadda inta ka horreysa 31ka Disember ee Sannadguuradaas.

## Qodobka 58aad

*Isbeddelka Miisaaniyadda*

Haddii Sannadguurada dhexdheeda loo baahdo isbeddel Miisaaniyadeed ha ahaatee kharashyada cusub ama kala wareejin lagaga wareejinaayo lacag Madax iyo madax-xigayaal laguna wareejinaayo kuwa kale, waxa isbeddeladaasoo oggolaanaya Xoghayaha Guud ee Xisbiga.

## Qodobka 59aad

SHARAXA DAKHLIGA

Dakhliga Xisbiga waxa looga jeedaa dhammaan lacagaha Xisbigu xaq u leeyahay, inuu ku uruuriyo sharci, amargoyn, xeer iyo wixii la mid ah.

## Qodobka 60aad

*SHARAXA KHARASHKA*

Kharashka Xisbigu wuxuu noqonayaa kharashyada laga bixiyo Miisaaniyadda la soo oggolaaday.

## Qodobka 61aad

*Ilaalinta xad-dhaafka Miisaaniyadda*

Lama kharash garayn karo lacagna in ka badan intii loogu soo *oggolaaday Miisaaniyadda Sannad-guurada.*

Qodobka 62aad

*Dhaqaale*

Dhammaan Saraakiisha ka mas'uulka ah kharashka waa inay ka shaqeeyaan Dhaqaalaha. Lacagta waa inaan la iska bixin macna la'aan.

Qodobka 63aad

*Buugga ilaalinta kharashka*

Qof kasta oo awood u leh kharash bixin waa inuu leeyahay buugga ilaalinta kharashka oo muujinaaya:

1. Kharashka la oggolaaday in laga bixiyo madax-xige kasta;
2. kharashka horey loo galay ee aan la bixin;
3. Kharashka la bixiyey iyo lacagta loogu gudbiyay awoodaha kharashka Saraakiisha kale ee idman.
4. Haraaga.

Qodobka 64aad

*Awoodda kharashka*

Guddoomiyaha hoggaanka maaliyadda wuxuu u wakiilan karaa awoodda khrashka maamulayaasha laamaha kale ee Xisbiga.

Qodobka 65aad

*Kala soocidda*

Dhammaan qiyaasaha dakhliga iyo kharashka ee Xisbiga waa in duuduub loogu muujiyaa miisaaniyadda.

Dakhliga iyo kharashku waa in loo qaybiyaa Madaxyaal iyo Madax-xigayaal.

Qodobka 66aad

*Xisaabta Bankiga*

Buugaagta jeegagga waa in lagu ilaaliyaa meel adag oo Quful iyo Fure leh markii aan la isticmaalayn. Buugaagta eanshuurta ee la isticmaalay waa in la xafidaa si loo helo markii hubin looga baahdo.

Jeegagga waxaa soo diyaarinaaya khasnajiga, waana wadajir ula saxiixaaya Guddoomiyaha Hoggaanka Maaliyadda Xisbiga. Jeegagga labada saxiix midna lama saari karo ilaa lacagta lagu qoro tirooyin iyo erayo.

Jeegagga lagama goyn karo buugaagtooda ilaa la saxiixo Haddii jeeg xumaado ama la tirtiro wuxuu ku oollaanayaa buugiiisa, haddii la jaray waxaa dib loogu lifaaqayaa buugiisii.

Jeegagga la qabto lacagtooda waxaa markiiba lagu shubayaa xisaabta Xisbiga ee Bankiga. Sinnaba jeegaggaa la qabtay looguma gudbin karo kharash ahaan cid kale.

Saraakiisha idman ee maamusha kharashka Xisbiga waxay ku bixinayaan kharashyada jeeg.

Qodobka 67aad

*Xafidaadda naqdiga iyo waraaqaha qiimaha leh*

Saraakiisha mas'uulka ahi waa inay hubiyaan in meel adag loo sameeyey ilaalinta naqdiga iyo waraaqaha qiimaha leh sida sanduuqa naqdiga, khasnad, ama qol adag sida ay ugu kala habboon yihiin.

Qaaraan-dhiibe kasta waa in loo sameeyaa kaar muujinaaya tafaasiisha soo socota:

1. Magaca qaaraan-dhiibaha;
2. taariikhduu billaabay qaaraan-dhiibuhu;
3. Xaasilka mushaarka bisha;
4. Lacagta uu bixiyo;
5. Meesha uu deggan yahay;
6. lambarka xaashida aqoonsiga;
7. Bil Sano;
8. XLB/XLQ.

Haddii khasnaddu ama qolka adagi ay leeyihiin laba quful, furayaasha waxaa kala haynaaya khasnajiga iyo qof kale oo uu doortay Guddoomiyaha Haggaanka Maaliyadda Xisbigu.

khasnad ama qol adag oo aanu Xisbigu lahayn in lacag lagu xafido waa ay reeban tahay.

Khasnadaha waa in lagu dhisaa derbiga ama sibirka qolka ay yaaliin.

Qodobka 68aad

*Xil wareejinta hantida ku jirta khasnadda*

Marka canshuur uruuriye uu xilka sanduuqa naqdigiisa ku wareejinaayo mid kale, waa inuu hubiyaa khasnajigu sida ku qoran qodobka 71 iyo 74, wixii haraa naqdi ahna waa in lagu shubaa khasnadda.

Mar allaale markii khasnaji uu xilka ku wareejinaayo mid kale fure-hayayaasha ayaa horta hubinaaya waxa khasnadda ama qolka adag ku jira. khasnajigu wuxuu la soo baxayaa warbixinta Bankiga wuxuuna samaynayaa dheellitir. Isla markii la hubiyo naqdiga lana dheellitiro haraaga Bankiga, ayaa caddayn ku saabsan arrintaa la gelinayaa buugga lacagta ee khasnadda. Taasoo wadajir ay u saxiixayaan khasnajiga cusub iyo kan tegaaya. Haraaga buugaagta qiimaha leh waxaa lagu hubinayaa inta aanan la wareejin diiwaanka buugaagta.

Lumidda fure khasnadeed ama qol adag waa in si degdeg ah qoraal ahaan loogu sheegaa Guddoomiyaha Haggaanka Maaliyadda Xisbiga tii oo faahfaahin dhan laga siinaayo. Isla markiiba waa in Guddoomiyaha Haggaanka Maaliyadda Xisbigu ama wakiilladiisu warqad sharci ah gudub ahaan ugu dhejiyaan iridda khasnadda ama qolka adag iyadoo ay joogaan waqtiga hawshan la qabanaayo fure-hayayaashii. waardiye waa in loo sameeyaa, hadday suurta gashana ku Boolis ah. khasnadda ama qolka adag waa in la keenaa furihii labaad ayna hubiyaan Saraakiil mas'uul ihi wixii ku jira tii oo ay joogaan fure hayayaashii. markii kaddib waa in aan la istiemaalin qolkii Adkaa ama khasnadda inta la beddelaayo qufulkii hore mid cusubna la keenaayo.

Waxaa laga yaabaa in la weydiisto Sarkaalkii mas'uulka ka ahaa furihii lumay inuu bixiyo kharashka qufulka la beddelayo iyo Furayaasha cusub kaddib marka uu hubsado Guddoomiyaha Haggaanka Maaliyadda Xisbigu.

Qodobka 69aad

*Guddiga Kormeerka hantida Xisbiga*

Guddiyo kormeera hantida dhammaan laamaha Xisbiga waa in la qabtaa Sannad walba dhammaadka Sannad-guurada iyo billowga Sannad-guurada cusub.

Qodobka 70aad

*Guddiyada Kormeerka kediska ah*

Guddiyada kormeerka kediska ah waa in la sameeyaa had iyo jeer.

Qodobka 71aad

*Doorashada xubnaha Guddiyada Kormeerka*

Guddiyada kormeerka waa inuu doortaa Guddoomiyaha Hoggaanka Maaliyadda Xisbigu.

Guddigu wuxuu ka koobnaanayaa markii suurto gal ay noqoto saddex qof. waana inay sinnaba uga yaraan laba qof. Sargaalka mas'uulka ka ah naqdigu waa inuu joogaa marka Guddigu kormeerayaan hawshiisa hase ahaatee xubin kama noqonaayo.

Qodobka 72aad

*Dhammaadka sannad-guurada Miisaaniyadda*

Dhaqdhaqaaq lacageed lama samayn karo inta u dhaxaysa dhammaadka sannad-guurada Miisaaniyadda iyo imaatinka Guddiga Kormeerka.

Qododbka 73aad

*Nidaamka Shaqada guddiga kormeerka hantida*

Guddiga waa inay tiriyaan naqdiga gacanta lagu hayo kuna eegaan haraaga dhabta ah ee soo baxay, kan buugga lacagta khasnaddu muujinaayo. Caddayn ay wada saxiixaan Guddigu waa in lagu qoraa buugga lacagta una habaysan sida soo socota:

Waxaan tirinay maanta lacagta naqdiga ee

Waxaannu aragnay inay tahay

kana kooban tahay sida soo socota:

| | | Sh. | St. |
|---|---|---|---|
| 1. | Waraaqo | | |
| 2. | Dhururi | | |
| 3. | jeegag (faahfaahsan) | | |
| 4. | Tigidho | | |
| 4. | Isugeyn. | | |

Haraaga uu muujinaayo buugga lacagtu waa:

| | | Sh. | St. |
|---|---|---|---|
| 1. Saxiixay | Guddoomiyuhu | | |
| 2. | Xubin | | |
| 3. | Xubin. | | |

Taariikh . . . 19. .

Qododbka 74aad

*eegidda Guddiga kormeerka warbixinta Bankiga*

Khasnajigu waa inuu ka helaa Bankiga warbixin caddaysan Xisaabta socota ee Xisbiga dhammaadka sannad-guurada Miisaaniyadda. khasnajigu waa inuu sameeyaa xaashida dheellitirka haraaga warbixinta Bankiga iyo ka buugga lacagta, dhellitirkaas waa in la hordhigaa Guddiga Kormeerka Hantida. dheellitirkaa waa in lagu qoraa buugga lacagta halka ka sarraysa saxiixa xubnaha Guddiga.

Qododbka 75aad

*Lumidda lacagaha iyo alaabta*

Lumidda lacagaha iyo alaabtu waxay u kala baxaan sidan soo socota:

1. Isdhinka lacagta Naqdiga ah;
2. Lumidda alaabta;
3. Lumidda Buugaagta lacag qabashada.



Qododbka 76aad

*La dagaallanka dhayalsiga iyo fulin xumida*

*Waa mas'uuliyadda khasnajiga inuu hubiyo in la dagaalanka dhayalsiga iyo fulin xumida hawsha si buuxda loo hirgeliyey oo ay* u socdaan si hufan.

Marka uu khasnajigu ama lacag hayaha uu ku yimaado isdhin naqdi oo aanay buuxin karayn, waxaa la samaynayaa xaashida lacag bixinta tii oo qaadashada garaynaaya xisaabta amaahda magac khasnajiga ama lacag-haayaha.

Marka isdhin ku yimaado xisaabta horumariska ah oo isla markaa aan la hagaajin karayn, waxaa la samaynayaa xaashida xisaab-toosinta tii oo qaadashada garaynta xisaabta amaahda magaca maamulaha hormariska lana dhigashada garaynaayo xisaabta hormariska intii isdhinta.

Marka isdhin ku yimaado xisaabaha cashuur uruuriyayaasha oo aan la buuxin karayn markiiba, waxaa la samaynayaa xaashida xisaab-toosinta tii oo qaadashada garaynaayo xisaabta amaahda magaca cashuur uruuriyaha lana dhigashada garaynaayo Madax-ama madax-xigayaalkii ku habboonaa intaas isdhinty lacagta.

Marka alaabooyin lumaan oo aan ahayn kuwa iskood u dhammaaday, ee aan isla markiiba la soo gudi karayn, waxaa la samaynanaa xaashida xisaab-toosinta tii oo qaadashada garanaayo xisaabta amaahda magaca bakhaar-hayaha, lana dhigashada garanaayo dakhliga qiimihii hore ee alaabta luntay. Tirada alaabta luntay waa in laga kacaa, lagana saaraa diiwaannada iyo liisaska alaabta.

Marka buugaagta lacag-qabashadu lumaan ee qiimahoodii hore aan markiiba la gudi karayn, waxaa la samaynayaa xaashida xisaab-toosinta tii oo qaadashada garaynaayo xisaabta amaahda qofka ka mas'uulka ahaa buugaagtaasi, lana dhigasha garaynaayo dakhliga qiimihii ay ku fadhiyeen. Haddii ay caddaato in buug lumay la isticmaalay oo lacag si tuugannimo ah loogu uruursaday lana qaatay waxaa lacagtaa qaadashada garaynaayaa xisaabta amaahda magaca qofkii ka mas'uulka ahaa buuggaas.

Dhmmaan lumidda alaabta ama lacagaha nooc kasta ha ahaadeene waa inaan si degdeg ah u wargeliyaa Sargaalka ka mas'uulka ahaa Guddoomiyaha Haggaanka Xisbiga isaga oo ogeysiinaaya Guddiga Baarista Xisbiga.

Qododbka 77aad

*Awoodda ka-kicidda khasaaraha*

Dhammaan noocyada khasaaraha ee ku yimaada maamul xumo ama shaki maamul xumo, tusaale tuugo ama khiyaamo waa in si degdeg ah loo war geliyaa Booliska iyo Guddiga Baarista Xisbiga.

Awoodda ka-kicidda khasaaraha alaabta iyo lacagta aan ka badnayn sh. s. 1.000 qof ahaan, waxaa iska leh Guddoomiyaha Hoggaanka Maaliydda Xisbiga.

Dhammaan ka-kicidda khasaaraha kale ee ka badan Sh. S0. 1.000 waxaa ka talinaaya Xoghayaha Guud ee Xisbiga.

Qodobka 78aad

*Xisaab gelinta dambe ee khasaardha*

Marka uu yimaado go'aanka Guddoomiyha hoggaanka Maaliyadda Xisbiga ama Xoghaya Guud ee Xisbiga ee lagaga kacaayo khasaare, khasnajigu mar walba kolka laga reebo ka-kicidda alaabta gabowday, wuxuu saaranayaa xaashida xisaab-toosinta tii oo u qaadasho garaynaayo kharashkii alaabta «lumidda naqdiga iyo alaabta» dhigashada garaynaaya xisaabta amaahda la xiriira.

Dhinaca alaabta gabowday awoodda ka-kicidda waxay amri kartaa in alaabta lagu iibiyo qiimaha u sareeya ee lagu heli karaayo ama lagu wareejiyo mashaariicda iskaa-wax-u-qabso. Marka alaabta la wareejiyo waa in laga saaraa diiwaanka alaabta lagu ilaaliyo ama Liiska alaabta marka la gadana waa in laga saaraa diiwaanka alaabta lagu ilaaliyo ama liiska alaabta, lacagta helana lagu shubaa bakhliga.

Qodobka 79aad

Ilaalinta alaabta iyo gaadiidka, iyo alaabta Hooy

Xubnaha xisbiga waa inay hubiyaan in hooy habboon loo yeelay dhammaan alaabada ay heleen si loogu ilaaliyo ammaankooda.

Qodobka 80aad

*Bakhaar-hayayaasha*

Bakhaar-hayayaashu waa inay hubiyaan in qolalka alaabta yaalaan la nadiifiyey lana hagaajiyey hawo keenayaal ku filanna leeyihiin. Bakhaar-hayayaashu waa inay si gaar ah uga foojignaadaan inaannu qof aan u idmanayni u maamulo waxa bakhaarrada yaala.

Qodobka 81aad

*Hubinta Bakhaarada maalin walba*

Bakhaar-hayayaashu waa inay maalin walba hubiyaan bakhaarradooda, waana inay degdeg u ogeysiiyaan Madaxdooda wixii luma, dhaawacma, daadiya iyo wixii xumaada.



Qodobka 82aad

*Nabadgelyada Bakhaarrada*

Bakhaar-hayayaashu iyagaa ruux ahaan ka mas'uul ah furayaasha Bakhaarrada ay mas'uulka ka yihiin, waana inay hubiyaan in qolalku si habboon loo adkeeyey intaannu ka bixin xerada.

Bakhaar-hayayaashu waa inay hubiyaan maalin walba inay xiran yihiin dariishadaha iyo Qufullada qolalka Bakhaarrada ay ka mas'uulka yihiin.

Bakhaar-hayayaashu qofna uma wakiilan karaan hawsha nabadgelyada iyo qufulillada qolalka Bakhaarrada.

Bakhaar-hayayaashu waa inaanay cidlayn Bakhaarrada marka ay furan yihiin.

Qodobka 83aad

*Daryeelidda Bakhaarrada*

Tiimanka ama Foostooyinka ay ku jiraan waxyaabaha dareera waa in dhulka kor looga qaadaa si loo arko daadintooda.

Batroolka, Naftada, Gaaska, alaabta qaraxdaa alaabta ololka soo qabsata iyo kuwa khatarta ah waa inaan lala dhigin ama loo dhaweyn alaabada kale.

Alaabta aan lagu shaqaysan karayn ama kuwa gaboobay waa in gooni looga dhigaa kuwa aan weli la isticmaalin.

Waa inaan shixnadaha cusub waxba laga bixin haddii haraayo ka yaalliin shixnadihii hore.

Bakhar-hayayaashu waa inay hubiyaan in qalabka dabka lagu bakhtiiyo tiro fiicani taallo oo ay meel si dhib yar looga soo qaadi karo yaalliin. Waana inay si isdabajoog ah u hubiyaan haggaansanaanta iyo shaqaynta qalabka dabka lagu bakhtiiyo.

Bakhaar-hayayaashu waxay mas'uul ka yihiin:

1. Hubinta daryeelka iyo nidaaminta alaabada ay helaan.
2. U haynta alaabada si nidaamsan, una fududaynaysa bixintooda.
3. dhiibidda alaabta saxda ah ee la oggolaaday;
4. U dhiibidda alaabada qofkii loo soo oggolaaday ee wata dalab sharci ah oo keliya;
5. Khasaaraha iyo kharraabinta alaabada marmar ku timaadda dhayalsi iyo maamul xumadooda.

Qodobka 84aad

*Xil wareejinta alaabada*

Mar allaale markii Bakhaar-haye uu mid kale ku wareejinayo xilka alaabada Bakhaarrada, waa in si buuxda loo soo tiriyaa alaabala taalla Bakhaarrada oo dhan. Wixii faahfaahin loo baahdo waxaa lagu muujinayaa xaashida alaabada tirsan lagu qoray ee ay wada saxiixayaan Bakhaar-hayaha cusub iyo kii hore.

Qodobka 85aad

*Qabashada iyo dhiibidda alaabada*

Dhammaan alaabada uu helo Xisbigu ama xubnihiisa kala geddisani waa inay wataan mid ka mid ah foomamka soo socda:

1. Nuqulka saddexaad ee dalabka iibka gudaha;

2. Nuqulka Sare ee xaashida alaab qaadashada.

Qodobka 86aad

*Xaashiyaha alaab qabashada*

Habka dalabyada iibka gudaha waxa lagu caddeeyey qaybta 4aad ee Sharciga. marka la helo alaab Waddanka gudihiisa laga soo iibsaday waxa si deggan loogu hubinayaa dalabkeedii iibka gudaha. Haddii isdhin ama dhaawac laga helo waxaa isla markiiba lala socodsiinayaa Madaxda ku shaqo leh.

Qodobka 87aad

*Xaashida alaab qabashada*

xaashiyaha alaab qabashada waa in la isticmaalaa si ay u taageerto alaabada la helay ee aan waddan iibsiga dalabka gudaha.

Xaashiyahaasi waxa loo daabacayaa qaab buug oo si taxan loo lambariyey tii oo xaashi waliba ka kooban tahay saddex koobi.

Koobiga ladaab iyo kan saddexaad ee xaashida alaab qabashada waa inay had iyo jeer ahaadaan asalka kaarboonka hore oo lagu qoray qalin aan tirmayn.

Waa in aan beddelaad lagu samayn xaashida alaab qabashada. Haddii khalad lagu sameeyo asalka iyo koobiga labaad waa in la tirtiraa, mid cusubna la dhiibaa.

Marka xaashi alaab qabasho la tirtiro waa in dhammaan koobiyada lagu dhaafaa buugga.



koobiga saddexaad ee xaashida alaab qabashada waa in aan la goyn ee lagu dhaafaa buugga ay ku tolan tahay.

Helitaanka alaabada waa in la hubiyaa lana geliyaa diiwaanka alaabada; waa in la daryeelaa ama la nidaamiyaa loona raseeyaa sidii meelahooda si fudud looga garan lahaa.

Qodobka 88aad

Dalabyada iyo xaashiyaha alaab dhiibidda

Waa in la isticmaalaa xaashiyaha sharciga ah ee soo socda si ay u taageeraan dhiibidda alaabada.

1. Xaashida alaab dhiibidda.

2. Xaashiyaha dalabka alaabada.

Dalabyada alaabada xaashiyaha alaab dhiibidda waa in loo daabacaa qaabka koobiyaal saddexan.

Alaabada waa in la dhiibaa oo keliya, kaddib marka la helo dalabka idman. koobiga hore iyo kan labaad waxa loo gudbinayaa Bakhaar-hayaha koobiga saddexaadna wuxuu ku harayaa buugga.

Marku helo, hubiyo ee uu raalli ku noqdo hagaagsanaanta dalabka, Bakhaar-hayahu waa inuu soo saaraa alaabta loo baahan yahay, dabadeedna si deggan ugu tiriyaa qofka qaadaaya hortiisa.

Qodobka 89aad

*Xaashida alaab dhiibidda*

Bakhaar-hayuhu wuxuu samaynayaa xaashida alaab dhiibidda markii alaab la qaadanaayo.

Alaabta waa in gacanta loo geliyaa qofka qaadaya oo qaadan doono nuqulka sare iyo ka labaad ee xaashida alaab dhiibidda. Nuqulka labaad waxa haysanaya qofka qaatay alaabta, nuqulka sarana waxa loo celinayaa alaab dhiibaha kaddib markii la soo saxiixo.

Bakhaar-hayuhu dabadeed waa inuu minguuriyaa nuqulka sare ee xaashida alaab dhiibidda diiwaanka alaabada baalka la xiriira. had iyo jeerna waa inuu ku muujiyaa diiwaanka alaabta, haraaga cusub.

Nuqulka sare ee dalabka waa in lagu lifaaqaa nuqulka sare ee xaashida alaab dhiibidda, dabadeedna uu si fiican u geliyaa Bakhaar-hayuhu diiwaanka alaabta.

Tirtirid laguma samayn karo diiwaanka alaabta. Saxidda khaladaadka tirooyinka iyo erayada waxaa lagu samaynayaa tii oo la jaraayo khaladkii, dushiisana lagu qoraayo tirooyinka iyo erayada saxa ah. saxidda sidaas oo kale ahna waa in la saxiixaa.

Diiwaanku waa inuu yeeshaa fure buug, alaabada nooc kastana waa inay ku lahaataa diiwaanka baal ama dhowr baal hadba sidii loogu baahdo.

Bog kasta oo ka mid ah diiwaanka alaabta korkiisa waxaa lagu muujinayaa habka ay u tirsamayso alaabtaasi. Alaab walba habkeeda tiro, ayaa lagu diiwaan gelinayaa loona dhiibayaa.

Diiwaanka waa in laga minguuriyaa maalin kasta xaashida alaab qabashada iyo xaashida alaab dhiibidda ee ku lug leh dhaqdhaqaaqa maalmeed.

Diiwaannada alaabta waa in loo xafidaa Guddiga Baarista Xisbiga si loo helo markii ay u baahdaan.

Dhammaan foomamka alaabada helitaankooda, waa in si degdegan loogu hubiyaa dalabka la xiriira ee kasnajiga. khasnajigu waa inuu si degdeg ah ulasocodsiiyaa Madbacadda Dawladda khalad kasta, ha ahaado xagga lambar siinta ama nooca la soo dhiibay. waa in isla markiiba uu ku celiyaa Madbacadda Dawladda Foomamka. khaladka uu ka helay. Haddii uu habkaa naaci waayo khasnajigu. Isaga ayaa ka mas'uul ah wixii khasaare ka soo gaara Xisbiga.

Foomamka harsan ee aan weli la isticmaalin waa in lagu ilaaliyaa meel adag oo quful iyo fure leh kana mid ah xafiiska khasnajiga. dhammaan foomamka alaabada ee harsan waa in si taxan oo gooni gooni ah loo geliyaa diiwaanka alaabta.

Dhammaan foomamka alaabada ee buuxsamay waa in si fiican loo xafidaa ugu yaraan 20 Sano.

Qodobka 90aad

*Alaabta raagsiimaadka lahayn*

Alaabta aan raagsiimiidka lahayn waa alaabtaa waqti yar ku dhammaata markii lagu shaqeeyo.

Qodobka 91aad

*Alaabta raagsiimaadka leh*

Alaabta raagsiimaadka lihi waa alaabta raysamaalka leh ee waqti dheer sii jirta, sida qalabka waaweyn ee xafiisyada iyo baabuurta iwm.

Hantida Xisbiga waa inuu maamulaa Guddoomiyaha Hoggaanka Maaliyadda Xisbiga.



Guddoomiyaha Haggaanka Maaliyadda Xisbigu waa inuu sameeyaa tirakoob fiican hantida Xisbiga.

Qofna gaar ahaan uma yeelan karo hantida Xisbiga.

Qodobka 92aad

*Liiska alaabta*

Liiska alaabeed waa inuu u sameeyaa Sargaal waliba alaabta raagsimaadka leh ee uu ammaankooda ka mas'uulka yahay. xafiis kastaba waa inuu samaystaa liis gooni ah. liiskaa w aain laga sameeyaa laba koobi. koow (koobiga «muhiimka ah» oo uu saxiixay Sargaalka ka mas'uulka ihi waxa lagu haynayaa xafiiska xisaabaadka, kan kalena waxaa haysanaaya isaga. koobiga muhiimka ah waa in la geliyaa buug).

Liiska alaabta waa in si habsami ah loo hayaa, oo alaabta cusub ee soo kordhay iyo tan dib loo qaataybа lagu minguuriyaa liiska markiiba. Marka alaab laba Sargaal isku wareejinayso waa inay labaduba saxiixaan liisaska alaabta oo ay caddeeyaan in alaabtii la hubiyey. Liisaska alaabta waa inuu hubiyaa waqtika waqti Sargaal Sare.

Qodobka 93aad

*xaashida warka baabuurta*

Xaashida warka baabuurta waa inuu u sameeyaa khasnajiga Xisbigu baabuur walba. Xaashida warka. baabuurta waxay muujinaysaa:

1. Lambarka baabuurka.
2. Lambarka maashinka
3. Lambarka qacaadada.
4. Lambarka taxan ee lugaha baabuurta.
5. Qiimihiisii hore.
6. Lacagta Caymiska.
7. Lambarka habka Caymiska.
8. Taariikhda la cusboonaysiiyey.
9. Faahfaahinta iyo qiimaha dayactirka iyo alaabta lagu dayactiray.
10. Faahfaahinta lugaha cusub.
    a) Taariikhda la geliyey.
    b) Inta uu socday taariikhda la geliyey
11. Halkuu ku dambeeyey.

Qodobka 94aad

Gaadiidka

Buugaagta warbixinta iyo kuwa codsiga Batroolkaba waa in loo sameeyaa dhammaan baabuurta Xisbiga.

Qodobka 95aad

*Caymiska*

dhammaan baabuurta waa in si macquul ah loo caymiyaa.

Qodobka 96aad

*Guddiga Kormeerka Sannad-Guurada*

Guddiga Kormeerka Sannad-guurada waa in loo qabtaa Bakhaarrada Xisbiga oo dhan Sannad walba, kaddib dhammaadka Miisaaniyadda iyo ka hor billowga shaqaqa Sannad-guurada xigta.

Qodobka 97aad

*Xubnaha Guddiga kormeerka*

Guddiga waa inuu ka koobmaa, meeshii suuragal ah, saddex qof oo aanhu marnaba ka yaraan laba qof. Bakhaarhayuhu waa inuu joogaa marka ay Guddiga hawshooda qabsanayaan, hase ahaatee aan xubin ka noqon.

Dhaqdhaqaaq alaabeed lama samayn karo inta u dhaxaysa dhammaadka Sannad-guurada iyo imaatinka Guddiga karmeerka Sannad-guurada.

Guddiga waxay:-

1. Isku hubinayaan wadarta dhab ahaan loo hayo nooc walba alaabada bakhaarka iyo haraaga uu muujinaayo diiwaanka alaabadu. Dabadeed go'aanka waxay ku muujinayaan warbixinta alaab tirinta.
2. Eegayaan alaabada gabowday ee aan shaqo galayn dabadeedna waxay muujinayaan go'aankooda warbixinta alaab tirinta.
3. Caddaynayaan warbixinta alaab tirinta.

Haddii alaabo dheeraad ahi soo baxdo degdeg ayay u diiwaangelinayaan iyagoo isticmaalaya xaashida alaab qabashada.

Haddii isdhin alaabo soo baxo, khasaaraha waxaa loo jarayaa xaashida alaab dhiibidda, waana la diiwaan gelinayaa.



Guddi kormeer oo kedis ah waa in la magacaabaa mar mar, shaqadooda iyo habka ay raacayaan waxay la mid tahay tan Guddiga Kormeerka Sannad-guurada.

Qodobka 98aad

*Qandaraasyada*

Dhammaan alaabada Bakhaarrada, qalabka xafiisyada, raashinka iwm. waa in laga soo qaataa Wakaaladaha madaxa bannaan ee dawladda tii oo aan qandaraas la gelin.

Dhammaan Shaqooyinka kale ee loo baahdo waxaa gaar loogu dhigay inay qabtaan Wakaaladaha Dawladda ee madax bannaan.

la bixin oo
ay ina soo
ay
ku alaabo
5.000 ti oo u
ka

Markii qandaraaska la gelaayo waa in lagu faafiyaa wargeysyada Xisbiga tii oo lagu caddaynaayo dhammaan shuruudaha la xiriira qandaraaskaa isaga ah,

Wuxuu Xeerkani dhaqan gelayaa marka uu soo saxiixo Xoghayaha Guud ee Xisb iga Hantiwadaagga Kacaanka Soomaaliyeed.